Xeerka Baananka Islaamiga ah
(Habeynta hawlaha iyo Maamulka bangiyada islaamiga ah)

**TUSMADA**


**1 CUTUBKA 1AAD GOGOL-DHIGA XEERKA .................................................... 2**

1.1 QODOBKA 1AAD; MAGACA XEERKA:................. **ERROR! BOOKMARK NOT DEFINED.**
1.2 QODOBKA 2AAD;TAFSIIRKA EREYADDA; ............................................................... 3
1.3 QODOBKA 3AAD: XADKA ADEEGSIGA XEERKA: ...................................................... 5
1.4 QODOBKA 4AAD: MABAADI'DA ASAASIGA AH EE BAANANKA ISLAAMIGA AH: ..... 5
1.5 QODOB 5AAD: HAWLAHA IYO AHDAAFTA BANGIYADA ISLAAMIGA AH: ................ 5

**2 CUTUBKA 2AAD: RUQSADSIINTA BANGIYADA ........................................ 6**

2.1 QODOBKA 6AAD: SHURUUDAHA RUQSAD SIINTA BAANANKA ISLAAMIGA AH IYO WAX YAALAHA KA REEBAN:............................................................................................ 6
2.2 QODOBKA 7AAD: CODSIGA RUQSADAHA IYO HUBINTA ......................................... 7
2.3 QODOBKA 8AAD: FIIGA SHATIYADA BAANANKA GANACSIGA**ERROR! BOOKMARK NOT DEFINED.**
2.4 QODOBKA 9AAD: RUQSAD-SIINTA HAY'ADAHA ..................................................... 8
2.5 QODOBKA 10AAD: ERAYADA KA REEBAN BAANANKA ISLAAMIGA AH. .................... 8
2.6 QODOBKA 11AAD FURASHADA LAAMO CUSUB......................................................... 8
2.7 QODOBKA 12AAD: BURINTA RUQSADAHA ............................................................. 8

**3 CUTUBKA 3AAD: LAHAANSHAHA IYO MAAMULKA BANGIYADA ISLAAMIGA AH ........................................................................................................ 9**

3.1 QODOBKA 13AAD: ASAASIDA IYO DHISIDA BANGIYADA ISLAAMGA AH: .................... 9
3.2 QODOBKA 14AAD: XADAYNTA LAHAANSHAHA SAAMI RAASAMAAL ..................... 9
3.3 QODOBKA 15 AAD: SAAMIYADA SHISHEEYE: ......................................................... 10
3.4 QODOBKA 16AAD: XIDHIIDH BAAN SHISHEEYE OO UU SAMEYSAN KARO BAAN ISLAAMI AHI. .......................................................................................................... 10
3.5 QODOBKA 17 AAD: RAASAMAALKA AASAASIGA AH EE BAANKA: ........................ 10
3.6 QODOBKA 18 AAD: MAAMULKA BAANKA: ............................................................. 10
3.7 QODOBKA 19 AAD: SIRTA BAANANKA ............................................................... 11

**4 CUTUBKA 4AAD: XILKA IYO WAAJIBAADKA MAALIYADEED EE BANGIYADA ISLAAMIGA AH: ...................................................................... 12**

4.1 QODOBKA 20AAD: DHIGAALKA BAANKA IYO XADAYNTIISA................................. 12
4.2 QODOBKA 21AAD: KAYDKA QOONDAYSAN EE BAANKA: ....................................... 12
4.3 QODOBKA 22AAD: HANTIDA DAREERTADA AH: .................................................. 13
4.4 QODOBKA 23AAD: XIDHIIDHKA BAANKA DHEXE IYO BAANANKA ISLAAMIGA AH 13

**1) CUTUBKA 5AAD: DAMAANADAHA, FAA'IIDO QAYBSIGA, ISKU BIIRIDDA BANGIYA IYO XAKAMEYNTOODA................................................... 13**

4.5 QODOBKA 24AAD: BIXINTA DAMAANADAHA DAYMAHA IYO HORUMARINTA MAALIYADEED. ............................................................................................ 13
4.6 QODOBKA 25AAD: FAA'IIDO IYO KHASAARE QAYBSIGA BANGIGA ISLAAMIGA AH: 14
4.7 QODOB 26AAD: ISKU BIIRIDA BANGIYADA:........................................................... 14

**5 CUTUBKA 6AAD: KORMEERKA, BAADHISTA IYO KAANTAROOLIDA, BAANKA SOMALILAND KU LEEYAHAY BANGIYADA ISLAAMIGA AH..... 15**

5.1 QODOBKA 27AAD: KORMEEKA BAANKA SOMALILAND KU SAMEEYO BAANANKA ISLAAMIGA IYO HAY'ADAHA MAALIYADEED ........ 15
5.2 QODODKA 28AAD: QAAB XISAABEEDKA BAANKA ISLAAMIGA AH ........ 15
5.3 QODOBKA 29AAD: HANTI DHAWRKA BANGIYADA ISLAAMIGA AH: ........ 16
5.4 QODOBKA 30AAD: GOLAHA SHAREECADA ISLAAMKA EE BANGIGA: ........ 16
5.5 QODOBKA 31AAD. MASUULAYADDA & AWOODAHA GOLAHA SHAREECADA ........ 17
5.6 QODOBKA 32AAD. XIDHIIDHIYE GOLAHA SHAREECADA ........ 18

**6 CUTUBKA 7AAD: AWOODAHA BAANKA SOMALILAND ........ 18**

6.1 QODOBKA 33AAD: AWOODAHA BANGIGA SOMALILAND, U LEEYAHAY LA-TALINTA & TILMAAMIDDA ........ 18
6.2 QODOBKA 34AAD AWOODA BANGIGA SOMALILAND U LEEYAHAY SOO DHEXGELIDA MAARAYNTA BANGIYADDA: ........ 19
6.3 QODOBKA 35AAD: MAS'UULIYADDA KORJOOG-NIMADA BAANKA ........ 20
6.4 QODOBKA 36 AAD: NIDAAMKA IYO GEBOGEBAYNTA BANGIYADA ISLAAMIGA AH ........ 20

**7 CUTUBKA 8AAD: QODOBO GUUD ........ 21**

7.1 QODOBKA 37 AAD: MAALMAHA SHAQADA IYO FASAXYADA BANGIYADA ........ 21
7.2 QODOBKA 38AAD: DENBIYADA AGAASIMASHAASHA, SHAQAALAHA IYO WAKIILADA. ........ 21
7.3 QODOBKA 39AAD: CIQAABO ........ 22
7.4 QODOBKA 40 AAD: MAMNUUCIDA DILAAL QADASHADA SHAQAALAHA. ........ 22
7.5 QODOBKA 41 AAD: OGOLAANSHAHA XEER ILAALIYAHA GUUD. ........ 23
7.6 QODOBKA 42 AAD: FASIRAADDA QODOBADA XEERKAN: ........ 23
7.7 QODOBKA 43 AAD: DHAQAN GALKA XEERKAN: ........ 23

***LIFAAQYO* ........ 24**

**SHURUUDO GUUD ........ 25**

# Cutubka 1aad Gogol-dhiga Xeerka

## 1.1 Qodobka 1aad; Ereybixinta

Ereyada xeerkan waxa loo fasirayaa ama loo micnaynayaa, haddii aanu nuxurku diideyn sidatan;

"Dalka" (Country) waxa loola jeeda dalka jamhuuriyadda Somaliland

"Madexweynaha" (president) waxa loola jeedaa Madaxweynaha Jamhuriyadda Somaliland.

"Wasiir" (Minister): waxa loola jeedaa Wasiirka maaliyadda.

"Baanka Somaliland (Somaliland Bank)": Micnihiisu waa Baanka Dhexe ee Somaliland ee lagu Aasaasay Xeerka Baanka Somaliland 1994;

"Gudiga Agaasinka Baanka **Dhexe ee** Somaliland" (Board of Directors) waa xubnaha loo magacaabey dejinta iyo fulinta ujeedooyinka loo aasaasay baanka **dhexe ee** Somaliland, lehna awood maamul iyo **hogaamineed**

"Baanka Islaamiga ah (Islamic Bank)": waxa loola jeedaa **baan ganacsi ( commercial bank )** oo dhamaan adeegyadiisa iyo ganacsigiisu waafaqsan yahay mabaadida iyo axkaamta shareecada islaamka, una haysata ogolaansho dhamaan hawlihiisa uu ka waddo Somaliland.

**Asaasyaal (founders): waa xubnaha lahaa fikradda lagu dhisay baanka Islaamiga ah waxayna ka mid yihiin saamiilayaasha.**

**Rasamaalka Asaasiga ah : waa lacagta isu geeyeen saamileydu ee lagu asaasay baanka Islaamiga.**

**Digaal: waxa loola jeedaa lacagta ay macaamiishu ( customers) dhigtaan baanka Islaamiga ah si ay ugu kaydsadaan**

**Hantida dareetada ah : Waxa loola jeeda lacagta naqadka ah ( cash).**

"Saami (Share)": Micnaheedu **waa xaddi ama qadar lacageed ( amount of money) ama hanti kale qof ama kaydsade ku darsaday hawlo ganacsi si uu macaash uga helo kana mid ah rasamaalka guud ee lagu fulinayo hawsha ganacsi .**

**Xafiis (office): waxa loola jeedaa goobta xarunta u ah baan islaamiya ama laamihiisa (branches).**

"Golaha Saamileyda Guud" (General Assembly): waxa loola jeedaa hantiilayaasha ama xubnaha saamilayda ee baanka **Islaamiga ah.**

"Golaha Agaasinka"(Board of Directors): waxa loola jeedaa xubnaha maamulka sare ee ay soo doorteen golaha saamilaydu baanka **Islaamiga ah.**

“Golaha Shareecada Islaamka” waxa looga jeedaa gole culimo ah oo ka mid ah hay’adaha maamulka baanka islaamiga ah, hawshooduna tahay hubinta in hawlaha baanku waafaqsan yihiin shareecada islaamka, lehna **astaamaha** ku asteysan qodobka 21aad ee xeerkan.

“Laan ama Farac (Branch)”: waxa loola jeedaa goobaha ka baxsan Xarunta baanka Islaamiga ahi ka fuliyo hawl-maalmeedkiisa, Waxaana ku jiri kara Laamaah Guur-gura, iyo kuwo loo asaasay Waqti Xadidan.

“Shirkad (Company)’: Micnaheedu waa ka uu siiyay Xeerka Shirkaddaha ee **2004.**

“Kaydsade (Depositor)”; Waa Qofka xisaab ku leh Baanka Islaamiga ah, Xisaabtu ha ahaato Xisaab socota, ama Xisaab Kaydsi ah ama Xisaab Mal-Gashiyeed iwm;

“Shirkad Shisheeye (Forgien Company)”: micnaheedu waa ka uu siiyay Xeerka Shrikaddadaha ee 2004.

“Hay’ad Shisheeye (Foreign Institution)’: Micnaheedu waa hay’ad maaliyadeed oo xarunteeda koowaad tahay dal kale oo aan ahayn Somaliland, hawl ganacsi oo ay ogolaansho u haystana ka wadda Somaliland.

“Baananka Islaamiga ah ee Caalamiga ah (International Islamic Banks)”: Micnihiisu waa Baan Islaami ah oo ka jira ama ka hawl gala hal-wadan wax ka badan.

“Keyd Islaami ah (Islamic Fund)”: Micnihiisu waa qadar lacageed oo qiimaheeda gacanta lagu dhigay ama la bixiyey, taasoo gacan ku dhigeedu ama dib u bixinteedu ku salaysan **tahay** axkaamta Shareecada **Islaamka .**

“Rukhsadda Ganacsiga (License)”: Micnaheedu waa Shatiga Ganacsiga lagu ogolaaday hawlgal **baan Islaamiya**, si waafaqsan: qodobka 5aad, 6aad, 7aad ee Xeerkan.

“Xafiis (office)”: Waxa loola jeedaa macnaha uu siiyey xeerka shirkadaha 2004.

“Shirkad Dawladeed (Public Company”: Micnaheedu waa ka u siiyay Xeerka Baanka Dhexe ee 1994.

“Shirkad hoos timaada ama ka farcanta Shirkad Weyn (Subsidiary)” micnaheedu waa ka uu siiyay Xeerka Shirkadaha ee 2004;

## 1.2 Qodobka 1aad; Magaca Xeerka:

Magaca Xeerka waxa uu noqonayaa Xeerka Baananka Islaamiga .

## 1.3 Baanka Dhexe ee JSL

Dawladda Somaliland waxa ay yeelanaysaa Baan Dhexe oo hoggaamiya siyaasadda iyo ilaalinta lacagta dalka. Waxa kale oo loo suurto-gelinayaa furitaanka baanan ganacsi iyo horumarineed iyada oo mudnaanta la siinayo kuwa gaar ahaaneed (Qod. 13aad ee dastuurka)

## 1.4 Qodobka 3aad: xadka adeegsiga xeerka:

1. Xeerkan waxa lagu dabaqayaa loona adeegsanayaa dhamaan **baananka** Islaamiga ah ee heshiisyadooda asaasiga ah uu ku cadyahay inuu baanku ku dhaqmayo axkaamta shareecada Islaamka ee ka hawl-gala Somaliland.
2. **Baananka** Islaamiga ah laguma dabaqi karo xeerkasta, wareegtooyin ama xeer hoosaadyo ka soo horjeeda axkaamta shareecada Islaamka.

## *1.5 Qodobka 4aad: Mabaadi'da Asaasiga ah ee Baananka Islaamiga ah:*

**Baanaka** Islaamiga ahi waxay ku dhisan yihiin kuna shaqaynayaan mabaadi iyo dhaqan wanaagsan oo ku salaysan shareecada **iyo axkaamta** islaamka, sida:

a) Hirgelinta nidaamka dhaqaale ee islaamka gaar ahaan dhinaca maaliyada iyo **baananka** .

b) Waxay hawlahooda maaliyadeed u raacayaan khusuusiyaad ku salaysan hab dhaqaale iyo maaliyadeed waafaqsan nidaamka shareecada islaamka.

c) Ka sokow inay yihiin **baanan** faa'iido doona hadana waxa uu xil ka saaran yahay horumarinta arimaha bulshada .

d) Waxay ka qayb qaadanayaan kor u qaadista heerka shaqaalaynta iyo wax soo saarka wadanka

e) Waxay bulsha weynta u soo bandhigayaan adeeg casri ah oo tartan geli kara isla markaana hufan oo xalaal ah, qancinna kara dhamaan macaamiishooda.
f) Waxay ka shaqaynayaan kor u qaadista kaadirka aqooneed iyo wacyiga bulshada ee arimaha bangiyada.

g) **Baananka islaamiga** ahi waxay kaalin mug leh ka qaadanayaan horumarinta arimaha ganacsiga ee JSL.

## 1.6 Qodob 5aad: Hawlaha iyo himilada Bangiyada Islaamiga ah:

Baananka Islaamiga ahi waxay qabanyaan dhamaan hawlaha iyo adeegyada ay **baananka** ganacsiga iyo ku maalgelintu sameeyaan iyagoo ku dhaqmaya hab waafaqsan mabaadi'da iyo axkaamta shareecada islaamka sida qabashada dhigalaada kala duwan iyo hawlaha maal-gelinta, waxa kale oo ay qabanayaan adeegyada/hawlaha soo socda:

a) Kobcinta iyo horumarinta hababka keydinta iyo xisaabaadka maal-gelinta

b) Ka qayb qaadashada hawlaha maal-gelinta ee dhinacyada beeraha, wershadaha, xoolaha, dhismayaasha, jidadka iyo dhamaan hawlaha horumarinta dhaqaalaha.

c) Bixinta dhammaan adeegyada maaliyadeed oo loo fulinayo hab waafaqsan dastuurka dalka iyo shareecada islaamka.

d) Gacansiinta maaliyadeed ee xirfadlayda iyo ganacsatada soo koraysa.

e) Samaynta ama ka qayb qaadashada abuurista shirkadaha ama sanduuqyada dhaqaale iyo maaliyadeed ee dalka.

f) Soo saarista saamiyada iyo shahaadooyinka maalgashi ee shirkadaha iyo sanduuqyada maaliyadeed.

g) Maal-gelinta dhamaan mashaariicda wax ku oolka ah ee kala duwan.

h) Gelista heshiisyada ganacsi, maal gashi iyo adeeg ee dalka gudihiisa iyo dibadiisaba.

i) Wax ku yeelashada saami rasamaal bangi kale dalka gudihiisa iyo dibadiisaba, si waafaqsan qodobada xeerkan.

j) Yeelashada hantida guurta ama ma guurtada ah ee bangigu hawlihiisa ku fulinayo ama uu ka sii ganacsanayo sidaa mashaariicda kirooyinka (real state).

k) **Baananka** islaamiga ahi waxay xisaabo u furi karaan macaamiishooda ku sugan dalka gudihiisa iyo dibadiisa haday tahay xisaabaha lacagaha qalaad iyo tan dalkaba (national and foreign currency).

l) Macaamiisha dhigaalka maal-galineed ku leh **baanka** islaamiga ah waxa ay wax ku yeelanaayaa wixii faa'iido ama khasaare ka dhasha hawl-galinta dhigaalkooda, iyada oo xaaladda khasaaraha ay shardi u tahay in aanu baanku la iman wax xad gudub ama gabood fal ah oo ku aadan maalgelinta iyo maamulkeedaba.

# 2 Cutubka 2aad: Ruqsadsiinta baananka

## 2.1 Qodobka 6$^{aad}$: Shuruudaha ruqsad siinta baananka islaamiga ah <u>iyo wax yaalaha ka reeban</u>:

1. Cidina kama dhaqangelin karto Jamhuuriyadda Somaliland hawlo la xidhiidha ku-Ganacsi baan islaami ah, ama hay;'ad kale oo maaliyadeed oo islaami ah haddii aanay **ogolaansho** ka haysan Baanka Dhexe **ee JSL**
2. Shirkad kasta oo doonaysa inay hawlo **baan** islaami ah ka wado dalka waa inay codsi ogaalsho ah u gudbisaa baanka dhexe.
3. Guddigga Agaasinka ee Baanka dhexe ayaa awood u leh inuu soo saaro ogolaanshaha codsiga baan islaamiya marka la buuxiyo shuruudaha ku xusan faqrada afraad ee qodobkan.
4. waxaa loo soo gudbiniyaa Baanka Dhexe codsiga ruqsadsiinta **baan** islaamiya oo uu soo saxeexay gudoomiyaha golaha asaasayaasha iyo xubin kale oo ka tirsan golaha aasaasayaasha baanka **islaamiga ah**, kuna lifaaqan yihiin wax yaabaha soo socda:

a) Heshiiska Aasaasida iyo Xeer Hoosaadka **Baanka**, Shirkada ama Hay'ada lagu dhisay (Memorundom and Articles of Association) oo ay ku cadahay inuu baanku ku dhaqmayo hab ganacsi ama adeeg oo waafaqsan axkaamta shareecada islaamka.

b) Liiska magacyada asaasayaasha, jinsyadahooda iyo **saamiyada** ay ku leeyihiin raasamaalka

c) Liiska magacyadda golaha shareecada, oo ay soo ogolaadeen golaha saamileyda guud.
d) Liiska magacyada maamulka guud ee baanka oo ay ku lifaaqan yihiin **taariikh nololeedkooda** (C.Vs) oo kooban .
e) Daraasad ku saabsan abuurista baanka (Feasibility Study or bussines plan) oo muujinaysa odoroska maaliyadeed ee ugu yaraan saddexda sanood ee soo socda.
f) Caddayn muujinaysa bixinta raasamaalka gundhiga ah.
g) Hadii cida rukhsadda doonayasaa tahay laan **(branch) baan** ajnabi oo islami ah, waxa kale oo looga baahan yahay:.
   a) In baanka ajnabiga ahi uu ka keeno baanka dhexe ee dalka uu asal ahaan ka diiwaan gashan yahay ogolaansho ah, inuu laan ka furan karo dalka Somaliland.
   b) Waxa kale oo looga baahan yahay inuu ka keeno xaruntiisa guud qoraal rasmi (undertaking) **oo ah inuu** baankaasi ku balan qaadayo masuuliyadda laantiisa.
   c) Wixii cadaymo kale ah ee uu u baahdo Baanka Dhexe ee Somaliland.

## 2.2 Qodobka 7aad: Codsiga Ruqsadaha iyo hubinta

1. Hay'ad kasta oo danaynaysa inay ka bilowdo hawlo baan islaami ah Jamhuuriyadda Somaliland, inta aaney bilaabin hawlaheeda, **waxay** qoraal kaga soo codsanaysaa **Baanka Dhexe** ee Somaliland **ogolaansho** sida ku cad qodobka 6aad ee cutubkan.
2. Guddigga Agaasinka Bangiga **Dhexe ee** Somaliland waxa uu hubinayaa codsiyada loo soo gudibiyey, isagoo sidaa ku bixinaya ruqsadda, hadii ay dhamaystiran yihiin dhamaan shuruudaha ruqsad siintu.
3. Haddii hay'addi haysay hawl ganacsi/adeeg maaliyadeed oo islaami ah dhaqan galka Xeerkan ka hor, waxa ay hay'addu dib u soo codsnaysaa **ogolaansho** isla marka uu dhaqangal noqdo Xeerkani.
4. Baanka dhexe ee **JSL**waxa uu kaga jawaabayaa mudo aan ka badanayn 30 casho gudaha hood oo ka bilaabmaya maalinta codsiga laga qabto, shirkaduna buuxiso shuruudaha ruqsad siinta.
5. Fiiga ruqsad siinta **Baanka Islaamiga waa hal mar keliya waana boqol iyo konton oo dollar keliya ( $150,000,=).**
6. Wasaaradda maaliyaddu waxa ay ka cafinaysaa baananka islaamiga ah cashuurta shirkadaha (company tax) shanta sanadood ee ku xiga hawlgalkood, iyadoo isla markaa u sameynaysa cashuur dhaaf dhamaan wixii alaab iyo qalab ay ka keensanayaan dibedda ee ay si gaar ah ugu adeegsanayaan hawlooda.
7. Ruqsad-siinta ka sokow, bangiga Somaliland waxa uu hubinyaa ku-habboonnaanshaha iyo hab-dhaqameedka dadka loo soo xushay in ay maamulaan hay'adda ruqsadda codsatay.
8. Marka hay'adi ka soo codsato Ruqsad **Bankiga Dhexe ee** Somaliland, waxa uu xaq u leeyahay in uu ku qanco:
   a. Haynta maaliyadeed iyo sooyaalka hay'addaa
   b. Qaabka iyo qaayaha maamulka la soo gudbiyey.
   c. Golaha shareecada ee loo asteeyey baanka islaamiga ah.
   d. Raasamaalka iyo faa'iido-odoroska baanka.
   e. Danta dalka iyo daryeelka bulshada ee ruqsadda la bixinayo laga dheefayo

**2.3 Qodobka 8aad: Cashuur sanadeedka Shatiga**

Baanka Dhexe ee Somaliland waxa uu ka qaadayaa Baanka Islaamiga ah ee la siiyey shatiga cashuur sanadeed dhan soddon kun dollar ($30.000,=).

**2.4 Qodobka 9aad:** Ruqsad-siinta **Baananka Islaamiga**

1. Iyada oo la tixgelinayo *Cutub II, Qodob 6aad* iyo 7aad **ee xeerakn**, Baanka **Dhexe ee** Somaliland waxa uu siinayaa ruqsad, marka fiiga laga shubo, bangi islaami ah ama shirkad maaliyadeed.
2. Baanka Dhexe ee Somaliland waxa uu ku lifaaqi karaa ruqsad-bixin waafaqsan qodobadan shuruudaha uu u arko inay daruuri yihiin, waxana uu hadba xilli wax ka beddeli karaa, ku kordhin karaa ama mid –mid ku doorin karaa hadba sida duruuftu u muuqato taasoo waafaqsan qodobada xeerkan.
3. **Baanka** ama hay'adda aan muddo 12 bilood gudahood ah ku bilaabin hawlihii ruqsadda loo siiyey, haddii ay weli danaynayso, waxa ay mar kale u soo codsnaysaa ruqsad sida ku cad Cutubkan, Qodobadiisa 5, 6.
4. Haddii aan lagu burin si waafqasan Cutubka II, Qodobka 12aad, ee hoos ka muuqda, ruqsaddu waxa ay ku dhacaysaa 12 bilood ka dib haddii aan cusboonaysiin loo soo codsan, markaas oo loo arkayo in weli ruqsaddu dhaqangal tahay inta laga soo oggolaanayo tan cusub.
5. Cusboonaysiinta Ruqsadda waxa qoraal loogu soo gudbinayaa Baanka Dhexe ee Somaliland 3 bilood **ka hor watqiga dhicitaanka ruqsadda.**
6. Marka la bixiyo fiiga cusboonaysiinta ruqsadda, Baanka Dhexe ee Somaliland waxa uu u cusboonaysiinayaa **baanka** ama hay'adda inay sii wadato hawlaheeda ganacsi **hal sano**.
7. Haddii aan saddex bilood gudahood dhicitaanka ruqsadda hore lagu soo gudbin codsi cusboonaysiin, waxa ku waajibaya 30% dheeraad ku ah fiigii caadiga ahaa codsadaha.
8. **Baanka ama hay,ad** la siiyey ruqsad ma wareejin karto wax ka badan 5% saamiyada **baanka** ama hay,adda iyadoon ogolaansho ka haysan baanka dhexe ee JSL.

**2.5 Qodobka 10aad: Magacbixinta baananka islaamiga ah.**

**Magaca baankasta** oo islaamiya waxa ogolaanaya baanka dhexe ee JSL si looga foojignaado in aan baan islaamiyi la bixin **magac aan ku habooneyn.**

**2.6 Qodobka 11aad furashada laamo (branches) cusub**

Ogolaansho qoraal ah oo laga helo baanka **Dhexe ee** Somaliland mooyaane, baan islaami ahi kama furan karo laan cusub, wakaalad ama xafiis meel kasta oo ka mid ah dalka Somaliland gudihiisa.

**2.7 <u>Qodobka 12aad: Burinta Ruqsadaha</u>**

**1.** Guddiga Agaasinka ee Bangiga Somaliland, isaga oo qoraal ku siinaya, waxa uu burin karaa Ruqsad hay'ad ama **baan** hore loo siiyey ka dib marka ay **ogolaato maxkamad sharci oo awood u lehi lalana socodsiiyey Wasiirka** haddii hay'addaasi ama **baankaasi:**

a) Hawlaheedii ganacsi ka joogsadeen Jamhuuriyadda Somaliland, hay'addu kacday, la kala diray, ama si kaleba u duuduubatay

b) Baal marto ku-dhaqanka xeerkan ama xeerar kale iyo qawaaniin, amarro ama wareegtooyin xeerkan waafaqsan oo ogeysiin aan ka yareyn saddex jeer **uu siiyey Baanka Dhexe ee JSL** mudo ugu yaraan bil **gudaheed** ah.
c) Hadii ay cadaato in baanka islaamiga ahi uu baalmarey axkaamta shareecada islaamka, isla markaana ka dhega adeygay talooyinka Golaha shareecada islaamka ee baanka.
d) Baanka islaamiga ahi waxa uu xaq u leeyahay inuu u dacwoodo maxkamadda ay khuseyso dacwadiisu, haduu u arko in ruqsada looga qaaday sifo aan sharci ahayn.

e) Hay'adda liisankeeda la buriyey, inkasta oo lagala noqday ruqsadda, waxa ay hawlaheeda ay ku gebogebeyneyso hawlgalkeeda sii wadan karta mudada uu u cayimo Baanka Dhexe ee Somaliland, iyada oo aan dhigaallo dambe, furid xisaabo cusub, amah-bixin iyo maalgelin hor leh toonna ku tallaabsan doonin.

2. Iyada oo aan laga noqonayn burinta ruqsadda ayaa Baanka Dhexe ee Somaliland waxa u furan in uu qaado tallaabo kasta oo uu ku dammaanad qaadayo xaqa iyo xoolaha kayd-dhigtayaasha sida uu awoodda u siinayo Cutub ka lixaad, qodob 18aad, haddii loo arko daruuri, iyadoon laga talaabsan karin khusuusiyaadka baananka islaamiga ahi leeyihiin.

3. **Baanka Dhexe ee** Somaliland waxa uu ka tirtirayaa liiska diiwaan gelinta ee **baananka** islaamiga ah magaca hay'adda ama baan lagala noqday ruqsadda, waxaanu ku faafinayaa warsidaha rasmiga ah ee dawladda (official bulletin).

# 3 Cutubka 3aad: lahaanshaha iyo maamulka baananka Islaamiga ah

## 3.1 Qodobka 13aad: asaasida iyo dhisida baananka islaamga ah:

a) Dalka Jamhuuriyada Somaliland waxaa laga asaasi karaa baanan islaamiya si waafaqsan xeerkan waxaanay hawlahooda u gudanayaan sida uu dhigayo dastuurka dalku iyo xeerarka kale ee la xidhiidha ganacsiga iyo maaliyadda ee aan ka hor imanahayn axkaamta shareecada islaamka.
b) Baananka islaamiga ahi waxay yeelanayaan shakhsiyad qaanuuni ah oo madax banaan.
c) Baan islaamiya waxa dhisi kara shirkad ama shirkado wadaniya oo ka diiwaangashan dalka gudihiisa.
d) Iyada oo la tixgalinayo shuruudaha ku xusan faqrada 4aad ee qodobka 6aad ee xeerkan, baan islaamiya oo ajanabi ahi waxa uu ku yeelan karaa laamo baan dalka gudihiisa, marka baanka dhexe ee Somaliland u ogolaado.

## 3.2 Qodobka 14aad: Xadaynta lahaanshaha Saami Raasamaal

1. Cidina ma yeelan karto haddii aanay ahayn , Dawladda Jamhuuriyadda Somaliland ama Shirkad wadaniya oo ruqsad u haysata ka- ganacsiga hawlaha baan islaamiya, ama hayad maaliyadeed oo waadani ah mooyaane; raasamaalka aasaasiga 51%.
2. Baan/hay'ad maaliyadeed oo ajanebi ahi, ma yeelan karo wax ka badan 49% saami ee raasamaalka baankaas/hayadaas.

**3.3 Qodobka 15 aad: saamiyada shisheeye:**

Dadka shisheeyaha ahi waxa ay ku yeelan karaan saamiyo raasamaal baan kasta oo lagu asaasay si waafaqsan qodobada xeerkan, kamana badan karaan saamiyadaasi 49% raasamaalka gundhiga ah ee baanka ee la xadiday ama lagu dhawaaqay.

**3.4 Qodobka 16aad: xidhiidh baan shisheeye oo uu sameysan karo baan islaami ahi.**

1. Iyadoo loo hogaansamayo faqrada 2aad ee qodobkan baan islaamiya oo waliba waxa uu dibada ku yeelan karaa baan uu xidhiidh sugan (correspondence bank) la leeyahay iyo wakiilba.
2. Baanka dhexe waxa uu go'aan qoraal ah ku siinayaa baanka islaamiga ah, aragtidiisa ku aadan baanka uu xidhiidha la yeelanayo.

**3.5 Qodobka 17 aad: Raasamaalka aasaasiga ah ee baanka:**

**1-** Cidkasta oo daneynaysa in ay ka fuliso dalka Somaliland hawl baan islaami ah waxa ku waajiba ah inay shubaan raasamaalka gundhiga ah ee baanka **kuna shubaan baan caalami ah oo la qoonsan yahay si loo ilaaliyo hantida saamileyda iyo macaamiisha.**

2- Raasamaalka gundhiga ah ee baan kasta oo islaami ahi waa **shan milyan oo dollar( $5,000,000) .**

**3- Raasamaalka gundhigga ah ee ku xusan Faqradda 1aad waa in caydantiisa qoraal ahaan loogu soo gudbiyaa baanka dhexe ee Somaliland.**

4- Ilaha maaliyadeed ee baanka islaamiga ah waxa ay noqonayaan:

1. Raasamaalka baanka ee ay bixiyee
2. n saamilayda baanku.
3. Dhigaalada kala duwan ee baanka.
4. Kaydadka qoondaysan ee ka yimi faa'iidooyinka guud ama kuwa saafiga ah ee baanka.
5. Ilo kale oo waafaqsan xeerkan iyo shuruucda baanka

**3.6 Qodobka 18 aad: maamulka baanka:**

Baan kasta oo islaami ah oo lagu dhisay si waafaqsan xeerkan waxa uu yeelanayaa qaab-dhismeed maamul, waxana lagu faahfaahinayaa xeer hoosaadka baanka, waana inuu ka koobnaadaa:

A.<u>Golaha Saamileyda Guud</u>

Waa hay'ada maamul ee ugu saraysa ee baan kasta oo islaami ahi leeyahay waxaana ka mida awoodaheeda:

1. Eegista iyo ogolanshaha xeerka aasaasiga ah, xeer hoosaadka iyo ansixinta qorshe sannadeedka baanka.
2. Waxay dooranayaan golaha agaasinka baanka, waxaanay xaddidayaan gunnooyinkooda.
3. Waxay ogolaanayaan/diidi karaaan/ xisaab xidhka sannad maaliyadeedka baanka.

4. Ogolaanshaha xadiga faa'iido ee loo qaybinayo saamilayda.
5. Magacaabidda hantidhawr **madaxbanaan** ah (external audit) si waafaqsan qodobada xeerkan iyo ansixinta gunadda la siinayo (fee).

B) Golaha agaasinka baanka:

Waa golaha maamula baanka waxaanay si toosa masuul uga yihiin ilaalinta qodobada xeerkan iyo wixii awaamiira ee ka soo baxa baanka dhexe
waxaanay fulinayaa ujeedooyinka guud ee baanku leeyahay ee ku xusan xeerka asaasiaga ah ee baanka waxa kale oo ay qabanayaan hawlaha soo socda:

1. Waxa ay dejinayaan qorshayaasha iyo siyaasadaha guud (general policies) ee baanka khaasatan wixii dhinaca horumarinta iyo hawlaha maalgelinta, taageero fidinta ee uu baanku samaynayo.
2. Waxa ay magacaabayaan maamulka guud ee baanka iyaga oo u eegaya dhinacyada akhlaaqda, aqoonta, kartida iyo waayo aragnimada shaqo ee hawl wadeenku leeyahay.
3. Waxa uu golaha agaasinka baanka yeelan karaa, guddi hoosaadyo u qaybsan qaabka hawlaha muhiimka ah ee baanka.
4. Waxa ay **baadhis, qiimeyn** iyo dabagal joogto ah ku samaynaya dhamaan hawla baanka.

C) *Maamulka guud ee baanka (management)*

1. Maamulka guud ee baanka islaamiga ahi waxa uu masuul ka yahay inuu si habsamiya oo waafaqsan shuruucda iyo xeerarka baanka u socodsiiyo dhamaan hawlaha baanka.

2. Maamulka guud ee baanku waxa uu fulinayaa qorshayaasha iyo siyaadaha guud ee golaha agaasinku u dejiyey hawlaha baanka.

3. Waxa ay magacaabayaan shaqaalaha iyo hawl wadeenada baanka oo ay ku xulanayaan aqoontooda, amaanada iyo akhlaaqda wanaagsan ee shaqaalahaasu leeyahay, waxaanay soo saarayaan wixii **go,aanno** (**decisions**) iyo wareegtooyina (general regulations) ee lagu hagayo shaqada baanka.

4. Waxa ay u gudbinayaan dhamaan tirakoobka iyo xogaha baanka dhexe uga baahdo ama uu ka dalbado ee khuseeya hawlaha **baanka** islaamiga ah.
5. Waxa ay diyaarinayaan isla markaana u gudbinayaan golaha agaasinka ee baanka xisaab xidhka iyo warbixinta maaliyadeed ee sannad laha ah.

### 3.7 Qodobka 19 aad: Ilaalinta Sirta baananka

Waxa ka reeban xubin kasta oo maamulka baanka ka tirsan ha ahaato gudoomiyaha golaha agaasinka, ku xigeenkiisa, maamulaha baanka, ku xigeenkiisa iyo shaqaalaha baanka inuu faafiyo sir ama xog la xidhiidha xisaabaha macaamiisha, macaamilkooda ganacsi ama maaliyadeed, taasoo uu ku helay shaqaddiisa rasmiga ah ee baanka. Waxa laga soo reebayaa qodobka kor arimahan soo socda:

1) Xogaha iyo tirakoobyada uu soo codsado baanka dhexe isagoo gudanaya waajibaadkiisa **shaqo**. Baanka Dhexe xogahaas uma sii gudbin cid kale.

2) Xogaha iyo xisaabaadka ay codsato maxkamad sharci ahi, oo xidhiidh la leh hawlaha baananka.
3) Looma gudbin karo xogaha uu tilmaamey qaanuunkani cid aan ahayn maxkamadda ay khuseyso, haddii aan ogolaansho laga helin guddiga agaasinka baanka dhexe, iyadoo la dhawrayo sirta hawlaha baananka.

# 4 Cutubka 4aad: xilka iyo waajibaadka maaliyadeed ee baananka Islaamiga ah:

## 4.1 Qodobka 20aad: Dhigaalka baanka iyo xadayntiisa

1. Qof ama hay'ad aan haysan ruqsad ansax ahi ma qaban karo mana geli karo ganacsi dhigaal-qabasho ah.
2. Dhigaalada bangiyada islaamiga ahi, waxay u qaybsamyaa,xisaab socota,xisaab-keydsi,ama xisaab maalgashi.
3. Xeerkan marka laga hadlayo *'Dhigaal'* waxa **loola jeedaa** qadder lacag ah oo lugu dhiibay heshiis si:

    a. Dib loogu soo ceshado marka loo baahdo ama gaadho wakhti hore isula garteen dhigtaha iyo lala dhigtaha ama baanka.

    b. Aan ahayn hanti kale ama adeeg ama qaan-reeb (security)

4. Marka la eegayo *Qodobka 20 f**aq. 3aad xarafka** (b)*, lacag waa loo bixin karaa qaab u muuqan kara inuu yahay mid hantiyeed ama adeeg ama amaah-reeb, keliya haddii:
    a. Dhigaalkani yahay mid horumarin u ah ama *Qayb* ka ah qiimaha qandaraas wax-kala-iibsasho, kiro amah hanti-isdhaafsi ama adeeg, oo dib loo soo ceshan karo haddii aan qandaraaskii ama hantidii ama adeeggii la iibin ama la kirayn ama si kaleba loo bixin

    b. Marka dhigaalku daboolayo ama damaanad u yahay qanadaraas fulintiis ama khasaare iman kara oo sababi kara in uu fuliyo qandaraas lagu heshiiyey.
    c. Dhigaalku dammaanad ka yahay soocelinta ama keenidda hantiyeed oo dheer sida ku cad *faqradda (b)* .
5. Marka laga hadlayo Xeerkan *'Dhigaal'* looma arkayo lacag uu bixiyey Baanka Dhexe ee Somaliland.

## 4.2 Qodobka 21$^{aad}$: kaydka qoondaysan ee baanka:

1. **Baaananka** islaamiga ah ee lagu aasaasay si waafaqsan xeerkan waxa ay haynayaan oo ilaalinayaan kayd qoondaysan oo ka imanaya faaiidada saafiga ah ee baanka sannadkii ka dib marka laga saaro qadarka sakada ah ee ku waajibtay.

2. Bangiga islaamiga ahi waxa uu 10% oo faaiidadiisa saafiga ah ee sannadkii u wareejinayaa kaydka qoondaysan.

3. Marka uu kaydka qoondaysani gaadho ama uu la mid noqdo raasamaalka baxsan (paid-up capital) ee baanka markaa waa la joojinayaa wareejinta faa'iidada loo wareejinayo kaydka qoondaysan.

4. Hadii baanka dhexe uu ku qanco in kaydka qoondaysan ee baaanka islaamiga ahi ku filan yahay ganacsigiisa (business), markaa baanka dhexe waa ka dhaafi karaa in muddo ah in faa'iidada loo wareejiyo kaydka qoondaysan.

**4.3 Qodobka 22aad: Hantida dareertada ah ( liquid assets):**

1. Baanka dhexe xilli marka uu joogaba waxa uu dejinayaa hantida dareertada ah ee ugu yar ee oo looga baahan yahay inuu hayo baan kasta oo islaami ah.
2. Goynta hantida dareertada ah ee kor ku xusan **waxa Baanka Dhexe ku saleynayaa** qaab boqolay ah oo ay ka baxsantahay dhigaalada maalgashiga ah ee baanku leeyahay.
3. Macnaha hantida dareertada ah waxaa loola jeedaa:
    a) Lacagta noodhka ama jarjarka (qadaadiic) ah ee ka socota jamhuuriyadda Somaliland.
    b) Hadhaaga xisaabeed oo baan islaami ah ugu jira xisaab baanka dhexe uga furan.
    c) Hadhaaga xisaabeed ee ku jirta xisaabaha baanka islaamiga ah ugu furan bangiyada kale ee dalka gudihiisa iyo dibadiisa ee la heli karo marka loo baahdo.
    d) Shahaadooyinka maal-gashi ee kala duwan kuwaasoo baanka islaamiga ah ugu soo baxday baanka dhexe si waafaqsan axkaamta shareecada islaamka.
4. Baananka islaamiga ahi waxay mar walba fulinayaa diyaarna u ahaanayaan inay bixinyaan dhigaalada socda iyo kuwa waqtigoodii bislaaday (demand deposit or /sight deposits) ee macaamiishooda u hayaan markay dalbadaan.

**4.4 Qodobka 23aad: Xidhiidhka Baanka Dhexe iyo Baananka Islaamiga ah**

a) Baananka islaamiga ahi waxay qayb ku yeelanayaan qolka ama hoyga wax is dhaafsiga baananka *(clearing room)* ee baanka dhexe qaban qaabsho hab waafaqsan axkaamta shareecada islaamka.
b) Haddii ay baahiyi ku timaado baan islaamiya wuxuu baanka dhexe u fidinyaa **taageero waqti gaaban** ah (*short period financing*) baanka islaamiga ah iyada oo la raacayo heshiis ku salaysan shareecada islaamka.
c) Taageerada noocan ahi waxay shaqaynaysaa muddo aan ka badnayn 12 bilood.

5. Baanka islaamiga ahi waxa uu xisaabo ka furan karaan baanka dhexe, kuwaas oo noqon kara xisaabo lacag qalaad ah (hard currency) iyo ta dalkaba, sidaas oo kale waxa sameyn kara baanka dhexe, oo xisaabo ka furan kara baanka islaamiga ah.

# 5 Cutubka 5aad: Damaanadaha, faa'iido qaysiga, isku biiridda baananka iyo xakameyntooda

**5.1 Qodobka 24aad: Bixinta damaanadaha daymaha iyo horumarinta maaliyadeed.**

1. Baanka islaamiga ahi cidna masiin karo wax amaaha ama horumarin ah ama daamanada oo isku darkoodu ka badan yahay 25% raasamaalka baxsan ee baanka.
2. waxaa kale oo baanka islaamiga ah ka reeban:
   a) Inuu bixiyo dayn ama horumarin kasta oo lagu damaanad qaadayo saamiyo cidi ku leedahay baanka.
   b) Inuu siiyo wax dayna ama horumarina hawl-wadeenada ama shaqaaalaha baanka oo ka badan mushaharka **hal** (1) sanno ee shaqaalahaa ama hawl-wadeenkaas.
   c) Inuu bixiyo deymo aan si buuxda looga gaashaan-samaysan oo la siiyo:
      1. Qaar ka mid ah saraakiisha baanka
      2. Qof kasta oo dadka hoggaanka baanka/hay'adda ku jiraa dan ka leeyahay wakiil ahaan, waayeel ahaan, agaasime ahaan, maareeye ahaan ama saamile ahaanba
      3. Qof kasta oo saraakiisheedu uu ka yahay damiin
3. bixinta deyn kasta oo taagan ama amaah-fududayn la siiyey cid kasta oo ka tirsan agaasinka **baanka** ama hay'adda ama maaraynteeda oo aan,
   1. Si buuxda Guddiga hay'addu isugu waafaqin bixinteeda
   2. Si caadi ah ama dhabbo caadi ah loo soomarin oo la mid ah tan macmiilka caadiga ah maro
   3. Toddoba (7) maalmood gudahood Baanka Somaliland lagu soo ogeysiin

4. waxaa ka baxsan sida ku dhigan faqradaha 1aad iyo 2aad ee qodobka 24aad waxyaabaha soo socda:
   a) Wixii macaamila ee lala samaynayo hay'ad xukuumiya (public entity).

   b) Dhaqdhaqaaqyada maaliyadeed ee dhexmaraya baananka ama laamaha baan leeyahay.

   c) Macaamilaadka ganacsiga ee khuseeya dhoofinta iyo keenista badeecooyinka marka laga dalbado ictimaad baan isla markaana baanku leeyahay ducomenti-yada cadaynaya badeecada sida (bill of exchange, bill of lading).

**5.2 Qodobka 25aad: faa'iido iyo khasaare qaybsiga bangiga islaamiga ah:**

1) Baanna uma qaybin karo saamilayda baanka wax faa'iido ah haddii aan marka hore laga saarin:
   a. Dhamaan wixii kharashaad ku baxay dhisida iyo aasaaska baanka.
   b. Dhamaan wixii khasaare ah ee aan wax daboola oo dhab ah loo ahayn.
2) Baanku waa inuu ku talo gal u sameeyaa dhammaan daymaha quusta ah ( bad debts) iyo kuwa laga shakisan yahay soo noqoshadooda.

3) Baanku wuxuu awood u leeyahay maamulidda iyo bixinta sakada dhamaan ku waajibtay saamiyada ku jira raasamaalka baanka.

**5.3 Qodob 26aad: Isku biirida baananka:**

1. **Baanka** islaami waxa u banaan inuu ku biiro baan ama **baanan kale** islaamiya oo xeerkooda aasaasiga ahi dhigayo ku dhaqanka axkaamta shareecada islaamka.
2. **Baan aan** islaami ahayni waxa uu isubedeli karaa gabi ahaan ama qayb ahaan baan islaamiya, si waafaqasan xeerkan iyo xeerka shirkadaha Somaliland.
3. Hadii baan aan islaami ahayni uu qayb ahaan isu bedelo baan islaamiya ama uu qabto adeeg islaamiya, waxaa u shardiya in qaybtaas ama adeegaasi uu yeesho maamul iyo nidaam maaliyadeed oo madax banaan.
4. La wareegista isku darista sare ku xusan waa in ay waafaqsan tahay xeerka shirkadaha ee S/land.
5. Isku biirista iyo la wareegista ee dhexmarta laba **baan** iyo waxka badan ee waafaqsan xeekan waxay ku ansaxaysaa go'aan ka soo baxay fadhi caadiya ee golaha agaasinka baanka.

# 6 Cutubka 6aad: kormeerka, baadhista iyo kaantaroolida, baanka Somaliland ku leeyahay bangiyada islaamiga ah

## 6.1 Qodobka 27aad: Kormeeka Baanka Dhexe Somaliland ku sameeyo baananka islaamiga iyo Hay'adaha maaliyadeed

Gudida agaasimka ee baanka dhaxe waxay u xilaasaran yihiin,

1. masuuliyada hagista nidaamka maaliyadeed iyo baan gaar ahaan nidaamka dayn bixinta iyo maamulka kaydadka gudaha iyo dibada iyo sidoo kale ilaalinta qiimaha lacagta Somaliland iyo wax yaalaha kale ee muhiimka u ah koritaanka maaliyadeed iyo dhaqaale ee wadan .

2. Ilaalinta habsami u socodka hawlaha bangiyada islaamiga ah

3. Baanka Dhexe ee Somaliland waxa uu baan islaamiya ku samayn karaa baadhitaan uu ku hubinayo in hawsha baanku u socoto si hufnaan iyo habsami ah oo waafaqsan xeerka **baananka islaamiga ah.**

4. Marka baadhis ama kormeer noocan ah la samaynayo waxa ku waajib ah sarkal kasta iyo hawl-wadeennada Baanka ama hay'addaa in ay qofka kormeeraya xisaabaadkooda u soo saaraan oo siiyaan buugagga xisaabaadka iyo dhammaan xogo-xisaabeedka loo baahdo iyo wax kasta oo xog-ururina ama xaqiiqo-raadintaa,wakhtiga loo mudeeyey; iyada oo haddii taa laga gaabsado oo la heli waayo buugagga xisaabeed iyo xog-xisaabeedyada kale wakhtiga loo cayimay loo arki doonoin baankaasi ama hay'addaas mid ku gabbod-fashay Xeerkan

5. **Sarkaalka ama saraakiisha Baanka Dhexe ee** Somaliland u igmado kormeerka waxa uu warbixintiisa u soo gudbinayaa golaha agaasinka ee Baanka Dhexe ee Somaliland

## 6.2 Qododka 28aad: Qaab Xisaabeedka Baanka Islaamiga ah

Baankasta oo islaami ah waxa ku waajib ah inuu:

1. Baanka Somaliland u diro xisaab-xidhka sannad laha ah ee baanka oo ay ku jiraan xaashida dheeli-tirka miisaaniyadda iyo xisaabta khasaaraha iyo

faa'iidada ee baanka oo dhamaantood hanti-dhawrsan isla markaana uu ogolaaday golaha saamilayda baanku.

2. Si aan qarsoodi lahayn u dhigo, loogana helo xafiisyadiisa xisaab-xidh sanndeedkiisa kuna baahiyo xisaab-xidhiisa wargeysyada qaranka muddada Baanka ee Dhexe ee Somaliland u qoondeeyo baahinta .

3. Haddii hay'adi/baan islaami ahi ka gaabiyo inuu Baanka Dhexe ee Somaliland ugu soo gudbiyo xilliga loo cayimay xisaab-xidh sannadeedka oo hantidhawrka soo maray iyo warbixinta hantidhawrka ama uu ka gaabiyo inay, sida hadba Baanka Dhexe ee Somaliland ka soo codsado, u bixiyo xogaha laga rabo oo dhab ah oo buuxa/kala dhinnay wuxuu muteysandoonaa **ganaax lacageed** oo xeerkan waafaqsan.

**6.3 Qododka 29aad: Hanti dhawrka bangiyada Islaamiga ah:**

1. Sida ku cad Xeerka Shirkadaha ee 2004, Baan Islaamiya oo waliba waxa uu soo magacaabayaa sanad kasta Hanti dhawre **madax banaan** waxaana loo soo bandhigayaa Guddiga Agaasinka Baanka Dhexe si ay u ansixiyaan

2. Gudiga Agaasinka Baanka Dhexe ee Somaliland waxa ay magacaabi karaan Hanti Dhowre haddii Baanka Islaamiga ah uu soo magaaci waayo Hanti dhowre madax banana.

3. Waajibaadka Hanti Dhowraha ku xusan faqrada 1aad iyo 2aad ee loogu talo galay Baanka Islaamiga ah; wuxuu noqon karaa;
   b) In uu sanad kaa gudihiisa qabto hawlihii loo magacaabay oo Hanti dhowr-nimo; **iyo**

   t) In uu Warbixin ka sameeyo baadhitaan-kiisa Xaashida dheelitirka (Balance Sheet) iyo Xisaabta Faa'idada iyo Khasaaraha (Profit and loss account) ee Baanka;

**6.4 Qodobka 30aad: Golaha Shareecada Islaamka ee baanka:**

1- Baankasta oo islaami ah waxa waajib ku ah inuu yeesho golaha shareecada .

2- Golaha Shareecada ee baanka islaamiga ahi waa hay'ad ka kooban culimo lagu kalsoonyahay aqoon xeel dheerna u leh shareecada islaamka, gaar ahaan fiqiga maalka, axkaamta ganacsiga iyo mucaamalaadka, si fiicana ula socda hababka maalgelineed ee ay u shaqeeyaan **baananka** islaamiga ahi, awoodna u leh ka jawaab bixinta arimaha cusub ee la soo gudboonaada baanka iyo qaabkiisa shaqo, waana in ay ka mid tahay cid aqoon u leh arimaha dhaqaalaha iyo qaanuunka ee dalka gaar ahaan **baananka.**

3- **Tirada Golaha shareecadu kama yaraan karaan saddex (3) xubnood oo uu ku jiro xidhiidhiyaha golaha shareecada iyo baanku**.

4- Golaha shareecada waxa lagu magacaabayaa shirweynaha guud ee saamileyda baanka.

5- Golaha waxa loo qoondaynaya miisaaniyada lacageed ee ay ku shaqeynayaan sanadka, sidoo kale waxa loo diyaarinayaa xaruntii iyo dhamaan agabka shaqo ee ay u baahan yihiin.

6- Xubnaha golahani shaqo kale kama qaban karaan baanka **kamana mid noqon** karaan hantiilayaasha baanka .

7- Hadii xubin ka mid ah golaha shareecadu ka baxo ama **geeriyooto** xubinnimada golaha waxa uu golaha agaasinka baanka (board of Directors) sii magacaabayaa xubin buuxisa **jagada** banaanaatay, ka dibna waxa loo bandhigayaa shirweynaha guud marka uu qabsoomo.

8- Golaha shareecadu waxa ay yeelanayaan gudoomiye, gudoomiye-ku-xigeen iyo xoghaye.

9- Golaha shareecadu waxa ay yeelanayaan gunno oo ay u goynayaan golaha saamilayda guud ee baanku.

**6.5 Qodobka 31aad. Masuuliyadda & Awoodaha Golaha Shareecada**

1- Golaha shareecadda islaamku iyo guddiga **agaasinka baanka islaamiga** ahi waxa ay si wada jir ah u dejinayaan qaababka heshiisyada iyo hawlaha la xidhiidha mucaamalaadka bangigu la yeelanayo saamileyda, maalgashadayaasha, baananka, hay'adaha maaliga ah iyo macaamiisha kale oo dhan.
2- Waxay agaasinka baanka islaamiga u soo jeedinayaan qorshaha hawl sanadeedka baanka.
3- Waxa ay ka qeyb qaadanayaan wax ka bedelka iyo horumarinta qaababka shaqada iyo heshiisyada dhexmaraya baanka iyo cidkasta oo kale, si ay u suuro geliyaan waafajinta axkaamta shareecada islaamka.

4- Talooyinka sharciga ah ee ay bixiyaan golaha shareecada ee baanku waa mid fulinteedu waajib ku tahay agaasinka baanka islaamiga ah.

5- Waxay masuul ka yihiin curinta hab maalgelineed iyo adeegyo cusub oo waafaqsan shareecada islaamka.

6- Waxa ay hubinayaan sharci nimada dhamaan ganacsiga iyo adeegyadda baanka islaamiga ahi gudanayo.

7- Waxa ay bixinayaan tababaro dhinaca sharciga ah oo ay siinayaan shaqaalaha baanka, si ay kor ugu qaadaan fahamka dhinacyada sharci ee khuseeya shaqadooda.

8- Waxa ay jawaabo sharci ah iyo taloba ka bixinayaan hadba xaaladaha ama dhacdooyinka cusub ee ay u soo gudbinayaan agaasinka baanka islaamiga ah.

9- Waxa ay talooyin sharci ah ka bixinayaan hadba wixii khaladaad uga muuqda hawl-maalmeedka baanka, haddii:
   a. Agaasinka baanku u soo gudbiya ama

b. iyagu baadhitaan ku sameeya baanka ku ogaadaan

10- Golaha shareecadu waxa ay soo saarayaan warbixin sanadle ah oo ka kooban arimahan hoos ku qoran:

1) Qiimeyn sida uu baanku u ilaaliyey ku **dhaqanka shareecada** islaamka iyo fulinta talooyinkii Golaha Shareecada u gudbiyey baanka.
2) Caqabadihii (obstacles) ka hor yimi intay ku jireen gudashada waajibaadkooda sharci, sanad-xisaabeedka dhamaaday iyo siday uga gudbineen.
3) Su'aalihii la soo waydiiyey iyo arimihii loo soo bandhigay sanadka dhexdiisa, kulamadii ay yeelatey gudidu, arimihii ay ka doodeen, shirarkii ay ka qeyb galeen iyo waxyaalaha ay ku saabsanaayeen.
4) Qiimeyn warbixinta miisaaniyadda guud (annual report) ee baanka iwm.

### 6.6 Qodobka 32aad. Xidhiidhiye Golaha shareecada.

Maadaama aanay guddida shareecadu si maalinle ah ugu soo shaqo tegayn baanka ee ay tahay hay'ad la talineed oo si wakhtiyeysan u kulmeysa waxa:

1) Baanku uu yeelanayaa xubin si joogto ah u metesha golaha shareecada, si toos ahna uga hawl gasha baanka, si meel dhow loogala socda hawsha ka socota baanka, loona xidhiidhiyo Golaha iyo hawl-maalmeedka baanka.
2) Xidhiidhiyuhu waxa uu si joogto ah ula soconaysaa shaqo maalmeedka baanka, waxana uu hubinayaa meelmarinta qaabka shaqo iyo siyaasadda sharci ee golaha.
3) Xidhiidhiyuhu waxa uu ka talo bixinayaa dhacdooyinka maalinlaha ah ee xidhiidhka la leh dhinacyada sharciga.
4) Waxa uu u habeynayaa golaha shareecada hadba arimaha u baahan in ay ka soo saaraan go'aan, fatwo ama qaraar rasmi ah oo qoraal ah.

# 7 Cutubka 7aad: Awoodaha Baanka Somaliland

### 7.1 Qodobka 33aad: Awoodaha Baanka Dhexe ee Somaliland, u Leeyahay La-Talinta & Tilmaamidda

1. Haddii **Baanka Dhexe ee** Somaliland ku **qanco:**
   a) In hawlaha **baanka islaamiga ah** loo wado si aan waafaqsanayn ama ka hor imanaysa xeerkan ama si ka dhan ah danaha dadka dhigaallada leh ama tan dadweynaha.
   b) In **baank islaamiga** ah ama hay'adda **maaliyadeed** cid ka tirsan maaraynta guud ku jirto hawlo gabboodfal ku ah xeerkan waxa Baanka Dhexe ee Somaliland:

      I. Kala talinayaa baanka/hay'adda sida habdhaqanka hawlaheedu u muuqdo guud ahaanba
      *II.* Siin karaa baanka ama hay,adda tilmaamo lagu hagaajinayo habdhaqankeeda ganacsi ama sida loogu soo dabbaalayo baanka ku-dhaqanka xeerkan ama xeerarka kale ee laga dheegto
      *III.* Siinayaa tilmaamo baanka/hay'adda, cid kasta ama sarkaal kasta oo hay'adda ah in laga reebbanaado sifo kasta oo ku soo arooraysa *Qodob 33* ***Faq 1aad xarafka (a).***

2. Baanka **Dhexe ee** Somaliland, ka hor inta aanu wax tilmaamo ah ama awaamiir soo saarin sida uu dhigayo Qodob 33 faq.1aad, waxa uu ogeysiinayaa baanka ama sarkaalka ay khusayso isaga oo sharaxaad ka bixinaya sababaha ka dambeeya, isaga oo ka dalbanaya hay'adda ama sarkaalka in wakhti ku habboon lagu sababeeyo/lagu iftiimiyo sida wax u dhaceen ama u muuqdaan.

3. **Baanka Islaamiga** ama Hay'adda ay soo gaadhaan tilmaamaha Baanka Dhexe sida ku cad Cutubkan, waa inay wakhtiga loo cayimo ku hirgelisaa, haddii loo baahdana, ay caddaymo ka keento inay ku dhaqantay wixii la faray.
4. Baanka Dhexe ee Somaliland waxa uu tilmaamo ama awaamiir ka siin karaa baank/ hay'ad si ay u horumariso oo wax uga beddesho habdhaqanka hawlaheeda sida uu qeexayo Qodobkani, marka ay la xidhiidho:
    a. **Madaxda** sare ee ay tahay in hay'adi ku maamusho/ku kala waddo hawlaheeda gudaha Somaliland
    b. Tilmaamo ay tahay in hay'addu raacdo si ay nidaam fadhiya oo baan oo hufnaantiisa iyo firfircoonaantiisa leh u yeelato

5. Qof kasta oo ka gaabsada in uu ku dhaqmo tilmaamaha Qodobadan ,waxa uu galay gabbodfal uu ku mutaysanayo, ciqaabta uu tilmaamay Qodobka (39) .

### *7.2 Qodobka 34aad Awooda Bangiga Somaliland u leeyahay soo dhexgelida maaraynta bangiyadda:*

Haddii ay timaado xaalad maamul ama maaliyadeed oo keeni karta in baan islaami ahi xidhmo halisna ku ah maslaxada dhigaalayda baanka iyo dhaqaale ee wadanka labadaba isla markaana loo waayay wax maarayna xaaladaas, waxaa:

1. Agaasinka baanka dhexe magacaabi karaa Agaasime ama Maareeye Guud (DG) oo hawsha baanka la wareega, isaga oo raacaya nidaamka guud ee baanka iyo wixii shuruudo ah ama muddo hawleeda ee agaasinka Baanka Dhexe ee JSL u cayimo.

2. Magacaabiddu kama badan karto laba iyo toban (12) bilood sida uu ku caddaynayo Bangiga Somaliland magacaabista uu samaynayo, oo ay cusboonaysiin karto uun Maxkamadda Sare haddii uu sidaa codsado Baanka Dhexe Somaliland Maxkamaddana ay ugu muuqato in sii-dheeraynta magacaabistu maangal tahay.

3. Agaasimaha ama Maareeyaha Guud (DG) marka uu la wareego maamulka baan islaamiya ama hay'adeed maaliyadeed waxa uu si waafaqasan ka-ganacsiga hawsha baanka u agaasimayaa si xilkasnimo leh oo waafaqsan xeerkan .

4. Hawlaha uu Maareeye u xilsaaran yahay, waxa ka mid noqon doona:
    a. Raadgoobka iyo ilaalinta hantida hay'addu **leedahay**
    b. Soo-celinta deymaha ka maqan baanka ama hay'adda .

    c. Qiimaynta qaab-dhismeedka raasamaalka baanka ama hay'adda iyo kan maaraynteeda, iyada oo uu u soo jeedinayo Baanka Dhexe ee Somaliland dib-

u-habayn ama dib-u-qaabayn kasta oo uu door moodo, oo uu isagu, si waafaqsan xeerkan u hirgelin karo ayadoo loo danaynayo hay'adda

d. Saxeexidda ama gelidda heshiisyo, ay ka mid yihiin kuwo maaliyadeed ama maalgashi lagu kobciyo baanka lagu helayo, oo uu Maareeyuhu u arko daruuri

e. Ka guddoonto sarkaall ama hawlwadeen baan ama hay'ad wixii dukumenti, raadreebyo kale, xisabaad ama xogo la xidhiidha hawlaha uu baanku ama hay'addu ka ganacsato.

5. Isaga oo gudanaya waajibaadkiisa, Maareeyuhu waxa uu awood u leeyahay inuu muddo-joojiyo (moratorium) si dadka dhigaalka , maalgelinta ama deymaha leh loogu celiyo hantidooda, iyada oo muddo-joojintu:

a) Si isku mid ah ugu fulin doonto dadka deymaha leh oo idil, iyada oo haddii deyn ama amaahi kaga maqan tahay hay'adda lafteeda qaan-sheegtaha ama nulkiilaha dhigaalka laga goyn karo ama lagu gudbi karo deynta isaga ku maqan ee baanku ku leeyahay.

b) Maareeyihii baanka loo magacaabay waxa uu joojinyaa hawlmaalmeedka iyo maaraynta baanka marka uu dhammaado xilligii loo qoondeeyey ..

c) Golaha agaasinka baanka dhexe waxa uu tilmaami karaa in qaab dhismeedka maamul ee bangi islaamiya wax laga bedelo, iyada oo la dhawrayao danaha dhigaalyada baanka tan guud labadaba.

### 7.2 Qodobka 35aad: Mas'uuliyadda korjoog-nimada Baanka

**Agaasimaha ama Maareeyaha Guud (DG) ee Baanka Dhexe ee JSL u magacaabay baan islaami ah ama hay,ad maaliyadeed** waxa uu qoraal ku siinaya **baanka** ama hay'adda geftey jadwal caddaynayaa ciqaaabah ay mutaysatay iyo **ganaaxa** ku waajibey iyo wakhtiyada/qaababka loo kala bixinayo

a. Haddii Baanka Somaliland ku qanci waayo xog laga siiyey gef la toosiyey oo hay'adi ku kacday, waxa sii soconayaa ganaaxa lagu xukumay ilaa gefka la saxayo.

b. Haddii Baanku ku qanco in gefkii dhacay la toosiyey, ciqaabtiisii halkaas ayay ku hadhaysaa oo ku soo afjarmaysaa

### 7.3 Qodobka 36 aad: Nidaamka iyo gebogebaynta baananka islaamiga ah

1. Iyada oo la tixgalinayo qodobka 12aad ee xeerkan iyo sida uu tilmaamay xeerka shirkadaha Somaliland, xeerka madaniga ah iyo wixii shuruuca ee ku soo baxa hawlaha baananka Somaliland marka ay timaado xaalada kala dirista iyo

gabagabaynta baan islaamiya waxa la racaayaa wixii tilmaamo ah ee xeerkan u gaara.

2. Haddii baan islaami ihi uu kaco ama xidhmo waxaa bixinta qaamaha loo kala horaysiinaya sidan:
    a) Marka hore waxa la bixinayaa wixii amaanooyin cadaana yaalla.
    b) Ka dib bixinta amaanooyinka waxa la bixinayaa qaamaha ka yimi xisaabaadka socda.
    c) Labada qodob ee hore ka dib waxaa la bixinayaa qaamaha ka yimi xisaabka kaydka ama maal-gashiga.

c. Wixii soo hadha waxaa loo qaybinayaa saamiyalada baanka iyada oo lagu salayno qaybinta sida saamiyada ay u kala leeyihiin mana jiraan saamiyo si gaara loo hormarinayaa.

d. Awoodaha cida ay maxakamadu u cayinto kala dirista bangi Islaamiya waxaa loo raacayaa sida uu tilmaamay xeerka shirkadaha ee Somaliland.

# 8 Cutubka 8aad: Qodobo Guud

## 8.1 Qodobka 37 aad: Maalmaha shaqada iyo fasaxyada baananka

1) Baanka dhexe ee Somaliland ayaa xadidaya maalmaha shaqo iyo maalmaha fasaxa baananka ee rasmiga ah sanadka kasta.
2) Baanna ma joojin karo hawlihiisa maalin shaqo haddi aanu **ogolaan** la Baanka Dhexe ee JSL.

## 8.2 Qodobka 38aad: Denbiyada Agaasimashaasha, shaqaalaha iyo wakiilada.

**1-** Agaasime , maareeye, amaana-haye (Trustee), hanti-dhawre, shaqaale ama wakiil baan kasta oo islaamiya, haddii ay ku cadaato oo lagu helo **qodob ama** qodobada hoos ku **qoran** mid ka mid ah, waxa uu noqonayaa denbiile fal danbi, waxaanuu mutaysanayaa ganaax dhan 5 shan million oo shilin s/land, ah ama xidhig aan ka badnayn mudo 2 sano ah ama labadaba ganaax iyo xadhig laysugu daray **si waafaqsan xeerka ciqaabta guud iyo xeerka musuqmaasaqa:**

- a- Si badheedh ah u sameeyey, ama sababay in la sameeyo diwaan gelin aan sharci ahayn.
- b- Bixiyey warbixin, shati (Slip), dukmanti, ama qoraal ganacsi, arrimaha wax kal iibsashada (Transactions), shuruudaha raasamaalka (Assets), oo aan sifo sharci ah ku bixin.
- c- Si badheedh ah, u bedeley, tirtiray, qariyey, ka jaray, ama sabab u noqday xisaabo baan sifo aan sharci ahayn.
- d- Been abuur dockmanti, rukhsad, lacag, bixin sir macmiil, joojin fulinta amar maxkamadeed iwm.
- e- La shaqeyn la'aan iyo is hortaagid cid kasta oo sifo xeerkan waafaqsan uga codsata xog la xidhiidha baanka, sida hanti dhowrka guud, baadhitaanka baanka dhexe iwm.
- f- Ku kicid ama fududeyn arrimo khaayinnimo iyo wax-is-dhaafdhaafin ah.
- g- Fududeyn ama ka gaabin joojinta fal denbiyeed ka soo hor jeeda dhaqan gelinta xeerkan.

h- Xil gudasho la'aana, baylah, ama ku kicid fal keeni kara hanti lunsi, bixin xog aan sax ahayn ama qarin xog bixinteeda xaq loogu lahaa ama fal marin habaabin iyo been abuur ah.
i- Wixii fal dambiya ee ay ku kacaan saraakiisha, shaqaalaha, iyo wakiilada baanka islaamiga ah ee aan ku cadayn qodobada xeerkan waxaa loo raacayaa xeerka ciqaabta guud ee JSL.

**8.3 Qodobka 39aad: Ciqaabo.**

1- Baanka Somaliland, marka ay u caddaato in la baalmaray shuruucda xeerkan, waxa uu qoraal ku ogeysiinayaa hay'adda ay khusayso ee xeer jebintu ku cadaatey.

2- Iyadoo la tixgalinayo awoodaha golaha agaasinka Baanka Dhexe ee ku xusan cutubka 5aad ee xeerkan baan kasta/hay'ad maaliyadeed oo islaami ah oo jebisa ama si badheedh ah u baalmarta qodobada xeerkan , xeerarka kale iyo wareegtooyinka waafaqsan qodobada xeerkan waxa ay mutaysanaysaa ciqaab dhan toban (10) milyan oo shilin Somaliland ah .

3- Marka laga soo gudbo ogeysiinta ku cad faqradda (1) ee Qod. 39aad, golaha agaasinka Bank Dhexe ee Somaliland, waxa uu qoraal ku siinaya hay'adda geftey jadwal caddaynayaa ciqaabaha ay mutaysatay iyo **ganaaxa** ku waajibey iyo wakhtiyada/qaababka loo kala bixinayo

4- Haddii Baanka Somaliland ku qanci waayo xog laga siiyey gef la toosiyey oo **baan ama** hay'adi ku kacday, waxa Gudiga Agaasinku ku soo rogi karaan bankaas ciqaabo dheeraad ah ilaa gefkaas laga saxayo.

5- Haddii Baanku ku qanco in gefkii dhacay la toosiyey, ciqaabtiisii halkaas ayay ku hadhaysaa oo ku soo afjarmaysaa

**8.4 Qodobka 40 aad: Mamnuucida Dilaal qadashada shaqaalaha.**

2- Agaasime kasta, sarkaal ama shaqaale, ama qof kale oo mushar ka qaata baanka islaamiga ah, haddii ay ku cadaato oo lagu helo qodobdan hoos ku **qoran** mid ka mid ah, waxa uu noqonayaa denbiile fal danbi ku jira, waxaanuu mutaysanayaa ganaax **dhan** 5 shan million oo shilin S/Land, ama xidhig aan ka badnayn mudo 2 sano ah ama labadaba ganaax iyo xadhig laysugu daray.

a) Qaadasho hadiyad, weydiista, gacanta kudhiga , aqbalay ama ogolaaday, dilaal, mushar, khidmad, bakhshiish, laaluush, ama wax kasta oo qiimo leh oo lagu doonayo in lagu gaadho xaq cid kale leedahay, ama lagu hor-joogsanayo bixin xaq kale.

b) Sicir-ka-dhimis aanu awood u lahayn oo loogu tixgelinayo cidkale, lacag (note), jeeg, qaan-sheegta ee is-weydaarsiga (bill of Exchange) ama in qof loo ogolaado casayn xisaabta uu baanka ku leeyahay.

3- Cid kasta oo lagu soo oogo denbiyada kor ku xusan mid ka mid ah, wuxuu xaq u leeyahay - haduu ku qanci waayo eedayntaas - inuu is difaaco racfaanna ka qaato xukunka lagu riday.

### 8.5 Qodobka 41 aad: Ogolaanshaha Xeer Ilaaliyaha Guud.

Ciqaabaha xeerkan ku xusan qofna laguma oogi karo haddii aan oggolaansho looga haysan maxkamada awoodda u leh ama xeer ilaaliyaha guud ee qaranka.

### 8.6 Qodobka 42 aad: Fasiraadda qodobada xeerkan:

Qodobada xeerkan waxaa loo fasirayaa si waafaqsan **dastuurka, xeearka JSL**, axkaamta iyo shareecada Islaamka.

### 8.7 Qodobka 43aad: Nasakhid ama laalis

Waxa la laalay ama la nasakhay xeer ama sharci kasta oo ka soo horjeeda xeerkan.

### 8.8 Qodobka 44 aad: dhaqan galka xeerkan:

Xeerkani waxa uu dhaqan gelayaa marka Golaha Wakiiladda Jamhhuriyadda Somaliland ansixiyo Madaxweynuhuna saxeexo.

***Lifaaqyo***

General conditions

Shuruudo guud

Shuruudaha lagu Qiyaasayo Ku-Haboonaanta Xirfadeed iyo Kan Dhaqameed ee Dadka loo Xulayo Maamulidda Bangiyada/ Hay'adaha

a) Si looga go'aan gaadho ku-habboonaanta dhaqan iyo/ama xirfadeed ee cidda loo soo jeediyo inay hoggaamiso hay'ad, waxa Bangiga Somaliland ka hubinayaa sarkaalkaa, intii suurtagal ah, tilmaamahan hoos ku cad:
   I. Inta qofku qodan yahay ama uu miisaan leeyahay
   II. Kartidiisa iyo sida uu ugu habboon yahay qof go'aanka saxa ah ka qaadan kara hawlaha hoggaamintooda loo soo jeedinayo
   III. Heerka Dedaal ee ay u muuqato in qofkaasi gelin karo xilka loo igmayo

b) Iyada oo aan waxba loo dhimayn tilmaamaha faqradda (a), Bangiga Somaliland waxa uu dib u eegi karaa dhaqankiisii iyo sooyaalkiisii/waaya-aragnimadiisii shaqo ee hore ee mas'uulka, siiba dhinaca hawsha loo igmayo ama hawlaha la xidhiidha dhinaca maaliyadda, isagoo oo hubinaya in:
   I. Qofka la miisaamayo uu hore xadhig ugu mutaystay arrimo la xidhiidha khiyaamo iyo wax-isdaba-marin, oo muujinaya inuu yahay qof aan daacad/aamin ahayn

   II. Qofku hore u jebiyey qawaaniinta loogu talo galay inay dadweynaha ka ilaaliyaan hantidooda oo la lunsado daacad-darraantiisa ama karti-darradiisa ama hab-dhaqan xumaantiisa darted isagoo haya hawlo bangi, caymis, maalgelin ama adeeg maaliyadeed oo kaleba.

   III. Sarkaalku ka ahaa Agaasime hay'ad laalaabatay oo hawl iyo hantiba gabtay ama hadda la soo gebogebeynayo hawlihii ganacsi ee ay haysey.

   IV. Uu qayb ka ahaa hawl-fulinno hore oo Bangiga Somaliland ugu muuqda kuwo daacad-darro, lunsi hantiyeed ama aan ku habboonayn/qaynuunka balmarsan uu ku lug lahaa oo wax u dhimay qaabkiisa hawl-fulineed
   V. Uu ka qayb qaatay ama lagu xidhhidhiyo/xusuusto hawlo ama falgallo shaki gelin kara awooddiisa hoggaamineed, hawlgal ama go'aan qaadasho

Bangiga Somaliland waxa uu ka dalban karaa cid kasta oo mas'uuliyad-qabashadiisa la eegayo, in uu keeno waxyaabo kale oo ka marag-fura ku-habboonaantiisa, awooddiisa hawl-fulineed iyo heerkiisa xirfadeed ama dhaqan ee shakhsiyeed.

JADWALKA SADEXAAD
Somaliland Central bank
Foomka Codsiga Ruqsadda Ka-Ganacsiga Hawlo Bangi

Form- A

Magaca bangiga :( suggested name)………………………….
Cinwaanka Bangiga:
p.o.box………………………………..
tell…………………………………….
Email………………………………….
fax…………………………………..location_……………………………………

Company registration number___________________________
Waxaanu si sharaf iyo qadarin leh Idiinka codsanayaa Ruqsad ka-ganacsi hawlo bangi,iyada oo aanu halkan idiinku ku soo lifaaqnay shuruucdii baanka ,liiskii aasaasayaasha ,iyo liiskii Agaasimayaasha Sarre ee baanka.

1. Tafaasiisha Raasamaalka:
    a. Issued share capital (Nominal Value) ……………………………………
    b. (Paid-upshare capital……………………………………

Magaca iyo Cinwaanka Guddoomiyaha :
NAME ……………………………………
Address ……………………………………Tell ……………………………………
Mobile: ……………………………………Email: ……………………………………

Taariikh: ……………………………………….…………..

Magaca Guddoomiyaha ……………………………………….

Saxeexa………………………...……………………………….

Somaliland Central bank
Foomka Codsiga Ruqsadda Ka-Ganacsiga Hawlo Bangi
(Bangiyada Ajinebiga ah)

FORM B

Magaca Bangiga ……………………………………………………………………..
Cinwaanka Bangiga ..…………………………………………………………………...

*Waxa uu haklkan ku codsanayaa Ruqsad ka-ganacsi hawlo bangi.*

1. Waddanka/Dalka uu ka Diiwaabgashan yahay ……………………………………..
2. Halka uu ku yaallo Xafiiska La diiwaangeliyey ………………………………………
3. Tafaasiisha Raasamaalka: ……………………………………………………………….
    a) Qiimaha Uu u dhigmo (Nominal Value) ………………………………

b) Qiimaha Baxsoon (Paid-up Value) ……………………………………
c) Raasamaalka Laanta Somaliland

1. Magaca iyo Cinwaanka Maareeyaha Guud/Sarkaalka Fulinta:
……………………………………………………………………….
……………………………………………………………………….
……………………………………………………………………….
……………………………………………………………………….

Taariikh: ……………………………………………………………………….

Saxeexa Guddoomiyaha/Sarkaalka Fulinta: ……………………………………………………………………….

Foomka Codsiga Ruqsadda Ka-Ganacsiga Hay'ad Maaliyadeed

FORM C

1. Magaca Hay'adda Maaliyadeed ………………………………………………………..
2. Cinwaanka Hay'adda ……………………………………………………………………..

*Waxa uu halkan ku codsanayaa Ruqsad ka-ganacsi hawlo bangi.*

3. Tafaasiisha Raasamaalka:
   a. Qiimaha Uu u dhigmo (Nominal Value) ………………………
   b. Qiimaha Baxsoon (Paid-up Value) ……………………………

4. Magacyada iyo Cinwaannada Agaasimeyaasha:
……………………………………………………………………….
……………………………………………………………………….
……………………………………………………………………….
……………………………………………………………………….

5. Magaca iyo Cinwaanka Guddoomiyaha iyo Sarkaalka Fulinta:
……………………………………………………………………….
……………………………………………………………………….
……………………………………………………………………….
……………………………………………………………………….

Taariikh: ……………………………………………………………………….

Saxeexa Gudoomiyaha/Sarkaalka Fulinta: ………………………………………

JADWALKA AFRAAD

Somaliland Central bank form D

Foojarka Fiiga Ruqsadda

*(Bank)*

(Magaca Baanka ……………………………………………………
(Cinwaanka Baanka)……………………………………………………

---

Waxa uu halkan ku soo gudbinayaa fiigii Liisanka/Ruqsadda
ama Cusboonaysiinta Ruqsadda Ka-ganacsiga hawlaha Bangi

Taariilkh: ……………………………………………………

Lacag Qabasho

Waxa aan qabtay fii dhan.................................. oo ah kan Ruqsad Lr. ……………
laba iyo tobanka bilood ee ka bilaabmaysa ………………… kuna eg ………………………………………

……………………………………………………………….
Baanka Somaliland

*WA BILAAHI TAWFIIQ*

*DHAMAAD.*